**SOMALI TRANSLATION of the Department for Education statutory guidance for schools and colleges:**

**Keeping children safe in education 2026**

**Part one: Information for all school and college staff**

Find KCSIE Part 1 translated into 12 community languages at kcsietranslate.lgfl.net

NB This translation goes up to and includes the flowchart on page 27 of part one

Department for Education

# Dhawrista badqabka carruurta waxbarashada ku jirta 2026

## Hagaha sharciga ah ee dugsiyada iyo kuliyadaha.

## Sebteembar 2026

# Soo koobid

## Xaalada hagitaankan

Kani waa hagid sharci ahaaneed oo ka socota Waaxda Waxbarashada ('Waaxda') oo lagu soo saaray sida waafaqsan Qaybta 175 ee Xeerka Waxbarashada 2002 (sida wax looga beddelay), Xeerarka Waxbarashada (Heerarka Dugsiga Madaxa-bannaan) 2014, Xeerarka Dugsiyada Gaarka ah ee Aan La Dayactirin (England) 2015 iyo Xeerka Tababarrada, Xirfadaha, Carruurta iyo Waxbarashada 2009 (sida wax looga beddelay). Dugsiyada iyo kulliyadaha Ingiriisku **waa inay** tixgeliyaan marka ay gudanayaan waajibaadkooda ilaalinta iyo kor u qaadida fayoqabka carruurta. Ujeeddooyinka hagida awgeed carruurtu waxay ka dhigan tahay qof kasta oo ka yar 18 sano.

## Waxyaalo ku saabsan hagahan

Waxaan adeegsanaa ereyada “**waa in**” iyo “**waa in la sameeyaa**” guud ahaan hagahaan. Waxaan isticmaalnaa ereyga “**waa in**” marka qofka laga hadlayo uu sharciyan ku qasban yahay inuu wax sameeyo, halka ereyga “**waa in la sameeyaa**” loo adeegsado marka talada la bixiyay ay tahay in la raaco haddii aysan jirin sabab adag oo looga weecdo. Waxa weeye in hagaga lala akhriyaa.

- Hagaha sharciga ah Wada shaqeynaaya si Carruurta loogu Ilaaliyo, iyo
- Talada waax ahaaneed Maxaa la sameynayaa haddii aad ka walwasan taahay in ilmo la dhibaateynaayo: talo, and
- Hagaha sharciga ah, qeybta 3 ee Heerka aasaasiga ah ee sanaddada hore (EYFS) qaabka sharciga ah - GOV.UK (loogu talogalay carruurta da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 5 ee ku jira xanaanada iyo barbaarinta).

**Haddii aan wax kale la tilmaamin:**

- **'dugsi'** waxa uu macnahiisu yahay waa: dhammaan dugsiyada ha ahaadaan kuwo la dayactiray, kuwa aan la dayactirin ama kuwo madax-bannaan (oo ay ku jiraan akadeemiyada, dugsiyada bilaashka ah iyo akadeemiyadaha kale ee bixinta), dugsiyada barbaarinta ee la dayactiray[1]

[1] GundhigaQaab-dhismeedka Heerka Aasaaska Sanadaha Hore (EYFS) waa mid waajib ku ah dhammaan bixiyeyaasha sanadaha hore. Waxay khuseysaa dhammaan dugsiyada, kuwaas oo ay ku jiraan dugsiyada barbaarinta ee bixiya adeegyada sanadaha hore. Dugsiyada barbaarinta ee la dayactiray, sida dugsiyada kale ee ku qoran 'Ku saabsan Hagahan' hoosteeda, waa inay tixgeliyaan ilaalinta carruurta ammaankooda waxbarashada marka ay gudanayaan waajibaadka ilaalinta iyo kor u qaadida fayoqabka carruurta (iyadoo la raacayo qodobka 175(2) ee Xeerka Waxbarashada 2002 - eeg qoraalka hoose ee 19 si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan shuruudahan).

iyo waaxaha gudbinta ardayda.

- '**kulliyadda**' macnaheedu waa kulliyadaha waxbarashada dheeraadka ah iyo kulliyadaha fasalka 12 ee dugsiga sare sida lagu aasaasay Xeerka Waxbarashada Dheeraadka ah iyo Tacliinta Sare ee 1992 iyo machadyada loo qoondeeyay inay ku jiraan qaybta waxbarashada dheeraadka ah.[2] Waxa ay kulliyad sidoo kale la macno tahay bixiyeyaasha Waxbarashada fasalka 12 ee dugsiga sare ka danbeeya sida ku xusan Xeerka Tababarrada, Xirfadaha, Carruurta iyo Waxbarashada 2009 (sida wax looga beddelay).[3] 16-19 Akadeemiyo, machadyo waxbashada ka danbeysa fasalka 12 Bixiyeyaasha Tababarrada Madaxa-bannaan. Waxa uu kulliyadaha, hagitaanku la xiriiraa mas'uuliyadooda ku wajahan carruurta waxbarashada ama tababarka ka qaadanaya machadyadan.

## Dhibanayaasha iyo dambiilayaasha la sheegtay

Ujeeddooyinka hagitaankan awgeed, annaga, meelaha qaar, isticmaalnaa ereyga '**dhibane**'. Waa erey si weyn loo aqoonsan yahay loona fahmay. Waa muhiim in dugsiyada iyo kulliyadahu aqoonsadaan in qof kasta oo la dhibaateeyay aanu isu arkin dhibbane ama uu doonayo in sidaas lagu siyeeyo. Ugu dambeyntii, dugsiyada iyo kulliyadahu waa inay arrintan ka warqabaan marka ay maareynayaan dhacdo kasta oo ay diyaar u yihiin inay isticmaalaan erey kasta oo ilmuhu ugu raaxaysto.

Ujeedada hagitaankan awgeed, waxaanu, meelaha qaarkood, isticmaalnaa ereyga '**dambiile(yaasha) la sheegtay**' iyo meesha ku habboon '**dambiile(yaasha)'**. Kuwaasi waa ereyo si weyn loo isticmaalo loona aqoonsado, waana kuwa ugu habboon ee gacan ka geysan kara qorista hagitaan wax ku ool ah. Si kastaba ha ahaatee, dugsiyada iyo kulliyadahu waa inay si taxaddar leh uga fikiraan ereyada, gaar ahaan marka ay carruurta hortooda ka hadlayaan, ha yaraatee sababtoo ah xaaladaha qaarkood dhaqanka xadgudubka ah ayaa waxyeello ku ah sidoo kale dembiilaha. Sida kor ku xusan, isticmaalka ereyada ku habboon waxay noqon doontaa in dugsiyada iyo kulliyadaha ay go'aamiyaan, hadba sida ku habboon, kiisba-kiis.

## Qaawanaanta iyo nus-qaawanaanta, kuwaas oo ay ku jiraan kuwa AI-ga lagu sameeyay

Ujeeddooyinka tilmaamahan dartood, ereyga '**samaynta ama wadaagista sawirrada qaaqaawan iyo kuwa nus-qaawan**' waxaa loola jeedaa abuurista, dirista ama la doo degista sawirrada qaa qaawan ama kuwa nus-qaawan ee ay sameeyaan dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 18 sano. Ereyga '**sawirro**' waxaa ku jira dhammaan waxyaabaha muuqaalka ah, sida sawirrada, fiidiyowyada iyo live-ka ah.

---

[2] Sida ku cad qodobka 28-aad ee Xeerka Waxbarashada iyo Tacliinta Sare 1992 ('hay'adaha loo qoondeeyay').
[3] Xeerka Tababarrada, Xirfadaha, Carruurta iyo Waxbarashada 2009 (sida wax looga beddelay)

Waxaan ereyga '**qaawan**' u adeegsannaa sababtoo ah waa kan ugu badan ee ay dhallinyaradu si fiican u fahmaan, wuxuuna si fiican u soo bandhigayaa dhammaan dhaqamada wadaagga sawirrada ee ku jira hagitaankan.

Waxa sawirada qaadi kara ilmeha laftiisu (mararka qaarkood waxaa loogu yeeraa 'sawirda la iska sameeyay') ama waxaa qaadi kara ama abuuri kara qof kale. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in si dijitaal ahaana wax looga beddelo ama si buuxda loo sameeyo iyadoo la adeegsanayo AI, kuwaas oo ay ku jiraan waxa mararka qaarkood loogu yeero 'deep fakes' ama 'deep nudes'.

## Xeerka Ilaalinta Xogta 2018, GDPR-ka UK iyo Xeerka Xogta (Isticmaalka iyo Helitaanka) 2025 - 'xeerka ilaalinta xogta'

Waxa uu hagahan ereyga "**xeerka ilaalinta xogta**" kuseeyaa wadajir Xeerka Ilaalinta Xogta 2018, GDPR-ka UK iyo Xeerka Xogta (Isticmaalka iyo Helitaanka) 2025

## Waa ayo cidda hagitanka loogu talagalay

**Hagahahan sharciga ah waa in lala akhriyaa oo uu daba socdo:**

- **hay'adaha maamulka ee dugsiyada la dayactiray** (kuwaas oo ay ku jiraan dugsiyada xanaanada ee la dayactiray) iyo kulliyadaha oo ay ku jiraan bixiyeyaasha Waxbarashada ka danbaysa fasalka 12-ka ee dugsiga sare Waxbarashada sida ku xusan Xeerka Tababarrada, Xirfadaha, Carruurta iyo Waxbarashada 2009 (sida wax looga beddelay): 16-19 Akadeemiyo, machadyo gaar ah fasalka 12-ka ee dugsiga sare iyo Bixiyeyaasha Tababarrada Madaxa-bannaan,
- **mulkiilayaasha dugsiyada madaxa-bannaan** (kuwaas oo ay ku jiraan akadeemiyada, dugsiyada bilaashka ah iyo akadeemiyada bixinta ta beddelkeeda ah) iyo dugsiyada gaarka ah ee aan la dayactirin. Marka laga hadlaayo akadeemiyada, dugsiyada bilaashka ah iyo akadeemiyada kale ee bixinta beddelkeeda, mulkiiluhu wuxuu noqon doonaa Ururka/Mu'asasada akadeemiyada,
- **guddiyada maamulka ee cutubyada gudbinta ardayda** (PRUs), iyo
- **kooxaha hoggaanka sare**

Hagaha oo dhan, tixraaca '**hay'adaha maamulka iyo milkiilayaasha**' waxaa ka mid ah guddiyada maamulka haddii aan si kale loo sheegin.

## Shaqaalaha dugsiga iyo kulliyadda

Waa muhiim in **qof kasta** oo ka shaqeeya dugsiga ama kulliyad uu mas'uuliyadaha ilaalinta fahmo. Hay'adaha maamulka iyo milkiilayaasha waa inay hubiyaan in shaqaalaha si toos ah ula shaqeeya carruurta ay akhriyaan ugu

yaraan **Qaybta koowaad** ee hagitaankan.

Waa inay hay'adaha maamulka iyo milkiilayaasha, iyagoo la shaqeynaaya kooxahooda hoggaanka sare iyo gaar ahaan hoggaanka ilaalinta ee loo qoondeeyay, waa inay sidoo kale hadda hubiyaan in shaqaalaha aan si toos ah ula shaqeyn carruurta ay akhriyaan **Qaybta koowaad** ee hagitaankan.

Waa inay hay'adaha maamulka iyo mulkiilayaasha hubiyaan in la sameeyay habab lagu caawinayo shaqaalaha inay fahmaan oo ay gutaan doorarkooda iyo mas'uuliyadahooda sida ku xusan Qaybta koowaad ee hagitaankan.

## Waxa ay hagitaanku beddelayo

Waxa ay hagitaanku beddelayaa tii aheyd Badbaadada Carruurta ee waxbarashada Sibtember 2025. Soo koobid isbeddellada ah ayaa ku jirta Lifaaqa C.

# Qaybta koowaad: Macluumaadka ilaalinta carruurta ee loogu talagalay dhammaan shaqaalaha

## Waxa ay tahay inay shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadahu ogaadaan oo ay sameeyaan

### Habka ilaalinta iyo qorshe udub dhexaad u ah ilmaha

1. Dugsiyada iyo kuliyadaha iyo shaqaalahooda waxay qayb muhiim ah ka yihiin hanaanka balaaran ee nidaamka ilaalinta carruurta. Waxaa nidaamkan lagu sifeeyay tusmada sharciga ah ee [Wada shaqaynta ilaalinta Carruurta.]()

2. Ilaalinta iyo hormarinta badqabka carruurta ayaa ah masuuliyad qof kasta saaran. **'Carruur'** waxaa ka mid ah qof kasta oo ka yar da'da 18. Si loo buuxiyo mas'uuliyadan si wax ku ool ah, dhamaan dhakhaatiirta waa inay xaqiijiyaan waajahooda udub dhexaadka ilmaha ah. Tani waxay ka dhigan tahay inay ka fakaraan, mar kasta, waxa ay tahay maslaxadda ugu fiican ee ilmaha.

3. Ma jiro dhakhtar kali ah oo haysan kara sawirka baahiyaha buuxa ee ilmaha iyo duruufaha uu ku jiro. Haddii carruurta iyo qoysasku helayaan caawimaada saxda ah xilliga saxda ah, qof kasta oo la kulma iyaga wuxuu door ku leeyahay aqoonsiga walaacyada ay qabaan, uu la wadaago macluumaad uuna qaado tallaabo degdeg ah. Ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka carruurta waxaa lagu qeexaa marka aga fiirsho ujeedooyinka tusmadaan:

- Bixinta caawimaad iyo taageero si loo daboolo baahiyaha carruurta isla marka ay dhibaatooyinku soo shaac baxaan
- ka ilaalinta carruurta in si xun loola dhaqmo, hadday tahay guriga gudihiisa iyo dibaddiisa, oo ay ku jirto onlaynka
- ka hortagga laxaad la'aanta carruurta ee dhimirka iyo caafimaadka ama korrniinka jirka
- hubinta in carruurtu ku koraan xaalado waafaqsan bixinta daryeel badbaado leh oo waxtar leh
- qaadida tallaabo lagu suurtagalinayo dhammaan carruurta inay helaan natiijooyinka ugu wanaagsan

### Doorka shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda

4. Shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda si gaar ah ayey muhiim u yihiin maadaama ay leeyihiin awood ay walaaca ilmaha xili hore ku aqoonsadaan, ay kor ugu qaadaan faya dhawrka carruurta iyo inay siin karaan caawimaad, ayna ka hortagi karaan in walaaca ay carruurtu qabaan ka sii daro.

5. Dhammaan shaqaalaha waxaa saaran mas'uuliyada ah inay carruurta siiyaan goob ammaan ah oo ay wax ku bartaan.

6. Dhammaan shaqaalaha waa in ay diyaar u ahaadaan in ay gartaan carruurta laga yaabo in ay ka faa'iidaystaan Family Help.[4] Family Help waxa loola jeedaa bixinta taageero marka ay dhibaatadu soo baxdo, xilli kasta oo nolosha ilmaha ka mid ah, laga bilaabo sannadaha aasaasiga ah ilaa da'da dhallinyaranimada.

7. Xubin kasta oo shaqaale ah oo wax welwel ah ka qabta daryeelka ilmaha waa inuu raacdaa hannaanka lagu sheegay cutubyada 57-63. Shaqaaluha waa inuu diyaar u ahaadaan kataageerista shaqaalaha arrimaha bulshada iyo wakaaladaha kale iyagoo raacaaya gudbin kasta.

8. Dugsi kasta iyo kuliyad kastaa waa inay lahaato hoggaan ilaalineed oo loo qoondeeyey kaas oo siin doona taageerada shaqaalaha si ay u gutaan waajibaadkooda ilaalinta oo si dhow ula xidhiidhi doona adeegyada kale sida daryeelka bulshada ee dawladda hoose.

9. Hogaanka badbaadinta ee loo qoondeeyay (iyo cid kasta oo ku xigeenno u ah) waxay u badan yihiin in ay haystaan sawirka dhamaystiran ee ilaalinta ilmaha uuna noqdo hoggaanku qofka ugu habboon ee katalo bixinaaya jawaabta laga bixinaayo walaacyada dhanka ilaalinta.

10. Heerarka Macallimiinta ee 2012 waxay sheegayaan in macallimiintu (oo ay ku jiraan maamulayaasha dugsiga) ay tahay inay ilaaliyaan wanaagga carruurta iyo inay sii hayaan kalsoonida bulshada ee xirfadda macallinnimada, taas oo ka mid ah waajibaadkooda xirfadeed.[5]

## Waxa ay shaqaalaha dugsiga iyo kuliyada ay u baahan yihiin inay ogaadaan

11. Dhammaan shaqaalahu waa inay ka warqabaan nidaamyada dugsigooda ama kulliyadda taageeraya ilaalinta, kuwaasna waa in lagu sharraxaa qayb ka mid indhageshanka/hanuuninta shaqaalaha cusub. Tani waa inay ku jiraan:

- siyaasada ilaalinta ilmaha (iyo waxyaabo kale oo la socda oo sidoo kale ay ku jiraan siyaasada iyo nidaamyada lagaga jawaabayo tacaddiga ilmo-ilmo kale kula kaco)
- xeerka anshaxa (kaas oo ay ku jiraan tallaabooyin looga hortagayo cagajuglaynta, oo ay ku jirto cagajuglaynta onlaynka ah, midka ku saleysan takoorka, iyo kan takoorka ku dhisan).[6]

[4] Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan gargaarka hore waxa laga heli karaa [Working Together to Safeguard Children (Wada shaqaynta ilaalinta Carruurta).]
[5] ['Teachers Standard (Xeerarka Macalimiinta)]
[6] Dhammaan dugsiyada waxa looga baahan yahay inay yeeshaan siyaasad habdhaqan (faahfaahinta oo dhami waxaad ka helaysaa here (halkan)). Haddii kulliyaddu uu ubaahato in ay dagsato xeerka habdhaqanka waa in

- siyaasada habdhaqanka carruurta (mararka qaar loo yaqaan xeerka anshaxa) iyo waxyaabo kale, oo ay ku jiraan walaacyo yar, eedeymaha shaqaalaha iyo khashifida
- ilaalinta jawaabta carruurta ka maqan waxbarashada, gaar ahaan waqtiyada soo noqnoqda iyo/ama muddada dheer
- doorka hoggaanka ilaalinta ee loo qoondeeyay (oo ay ku jirto aqoonsiga hoggaanka ilaalinta iyo ku xigeennada kasta)

Nuqulada siyaasada iyo nuqulka **Farqadda koowaad** ee waraaqahan waa in loo ansixiyaa **dhammaan** shaqaalaha loo qoondeeyay.

12. Dhamaan shaqaaluhu waa in ay helaan tababar ku habboon oo ku saabsan ilaalinta iyo difaaca carruurta (oo ay ku jirto badbaadada onlaynka taas oo ka mid ah waxyaabo kale, fahamka filashada, doorka iyo waajibaadka khuseeya sifeynta iyo kormeerka – eeg cutubka 173-177 ee KCSIE si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah) xilliga tababarka bilowga ah. Tababarka waa in si joogto ah loo cusboonaysiiyaa. Intaa waxaa dheer, dhammaan shaqaaluha waa inay helaan ilaalinta iyo ilaalinta ilmaha (oo ay ku jirto badbaadada intarnet-ka) cusboonaysiinta (tusaale, iimaylka, jaraa'idka elagtarooniga ah, iyo shirarka shaqaalaha), kolba sidii loogu baahdo, iyo ugu yaraan sannad kasta, si loo sii wado bixinta xirfadaha la xiriira iyo aqoonta si-si waxtar le loo ilaaliyo carruurta.

13. Dhammaan shaqaaluha waa inay ogaadaan habka caawinta hore ee deegaankooda islamarkaana fahmaan doorkooda ay ku leeyihiin.

- shuruudaha, oo ay ku jiraan heerka baahida, marka kiiska loo gudbiyo taageerada Caawinta Qoyska iyo adeegyada lagu bixiyo:
    - Heerka caawimada hore ee la beegsaday (sida hoos timaada qaybaha 10 iyo 11 ee Xeerka Carruurta 2004), iyo
    - Adeegyada sharciga ah ee lagu bixiyo qaybta 17 ee Xeerka Carruurta 1989 (carruurta u baahan, oo ay ku jiraan sida tani u khusayso carruurta naafada ah)
- Shuruudaha, oo ay ku jiraan heerka baahida, marka kiiska loo gudbiyo Dawladda Hoose adeega daryeelka bulshada carruurta si loogu qiimeeyo iyo adeegyada sharciga ee hoos yimaada Qeybta 47 ee Sharciga Carruurta 1989 (sabab macquul ah oo looga shakisan yahay in ilme uu dhibaato qabo ama ay u badan tahay inay waxyeelo weyni soo gaadho)
    - Qaybta 31 ee Xeerka Carruurta 1989 (daryeelka iyo amarrada kormeerka), iyo
    - Qaybta 20 ee Xeerka Carruurta 1989 (waajibka in la dejiyo ilmaha)

---

loosheegaa shaqaalaha sida kor ku qeexan.

- iyo nidaamyo cad iyo hababka kiisaska la xiriira:
    - xadgudubka, dayaca, iyo dhiig-miirashada carruurta
    - Carruurta lagu maamulo gudaha guryaha badbaadada leh ee dhalinyarada
    - carruurta naafada ah

14. Dhammaan shaqaaluha waa inay ogaadaan waxa la samaynayo haddii ilmuhu u sheego in lagu xadgudbay, la isticmaalay, ama la dayacay. Shaqaaluha waa inay garanayaan sida ay u maaraynayaan heerka ilaalinta asturaad habboon. Tani macneheedu waa in dadka ku lug leh ee u baahan inay ku lug yeeshaan, sida hoggaanka ilaalinta loo magacaabay (ama ku xigeenkiisa) iyo daryeelka bulshada carruurta ee maamulka deegaanka. Shaqaalaha waa in aysan marna ilmaha u ballan qaadin in aysan cidna usheegi doonin warbixintiisa nooc kasta oo tacaddi ah, maadaama aysan arintaani ugu dambeyn noqon doonin maslaxada ugu haboon ee ilmaha.

15. Dhammaan shaqaaluhu waa inay awoodaan u xaqiijinta dhibanayaasha in cabashadooda si adag oo baaraayo lana siin doono taageero iyo badqab. Dhibbanaha marnaba waa inaan loo muujin in uu dhibaato abuuro marka uu soo sheegayo nooc kasta oo ah xadgudub iyo/ama dayacaad. Oo yeysan noqon in dhibane marna la dareensiiyo inuu dareemo ceeb markuu soo sheego tacaddika.

16. Dhamaan shaqaaluhu waa in ay ka war hayaan in carruurtu laga yaabo in aysan diyaar u ahayn ama aysan garanayn sida ay qof ugu sheegaan in lagu xadgudbayo, lagu faa’iidaysanayo, ama la dayacay, iyo/ama in aysan aqoonsan karin waayo-aragnimadooda inay tahay mid waxyeello leh. Tusaale, carruurta waxay dareemi karaan xishood, bahdilaad, ama in loo hanjabay. Tani waxay ka iman kartaa in ay nugulyihiin, laxaad la'aan iyo/ama aqoonsiga galmada ama caqabad luqad. Tani waa inaysan ka hor istaagin shaqaalaha in ay yeeshaan xirfad loo dhararo oo ay la hadlaan hogaanka ilaalinta loo qoondeeyay haddii ay walaac ka qabaan ilmo. Waxa kale oo muhiim ah in shaqaalaha go'aamiyaan sida ugu wanaagsan ee loo dhisi karo cilaaqaad la isku halleyn karo oo fududeeya xiriirka carruurta iyo dhallinyarada.

17. Waa inuu dhammaan shaqaaluhu ogaadaan in carruurtu ay la kulmi karto waxyeello ku salaysan cuqdada, oo ay ku jiraan cunsuriyad, nacayb ku salaysan diin, iyo noocyo kale oo takoor ah. Waxay khibrada noocan oo kale ah saameyn kartaa wanaagga ilmaha, fayoqabka, caafimaadka dhimirka, iyo rabitaanka inuu caawimo raadsado. Waa inay shaqaaluhu ka feejignaadaan calaamadaha iyo saameynta waxyeelada ku salaysan nacaybka, waana inay hubiyaan in walaacyada lagu tixgeliyo dhaqanka ilaalinta meesha ay ku habboon tahay.

# Waxa ay shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda ay tahay in ay u kuurgalaan

## Caawinta hore

18. Waa suurtogal inuu ilmo kasta ka faa'iidaysto caawinta hore, balse dhammaan shaqaalaha dugsiga iyo kulliyadda waa inay si gaar ah uga digtoonaadaan baahida suurtagalka ah ee caawinta hore ee ilmaha:

- laxaad la' ama qaba xanuunnada qaar islamarkaana leh baahiyo dheeraad ah oo gaar ah
- qaba baahiyo waxbarasho oo gaar ah (ha haystaan ama yey haysan qorshe waxbarasho, caafimaad iyo daryeel sharci ah)
- qaba baahi caafimaad oo dhimirka ah
- ah daryeele dhalinyaro ah
- uur leh/ama iyagu waaba waalid
- muujiyay calaamadaha hordhaca ah ee xadgudubka, rabshadaha iyo/ama habdhaqan waxyeelo wata
- muujinaya calaamado u horseedayay ka dhex bixidda dadka ama habdhaqan danbiile, oo ay ka mid tahay ku lug yeelasho burcad iyo la shaqaynta danbiyada las oo abaabulay ama khadka ismaamulka
- si soo noqnoqta uu uga maqanyahay waxbarashada, guriga ama daryeelka,
- uu la kulmay cayrin badan, halis ugu jiro in si joogto ah looga saaro dugsiyada, kulliyadaha iyo qayb ka duwan ama Qaybta Waaxda Gudbinta Ardayda.
- uu halis ugu jiro in la adeegsado, addoonsiga casriga ah, ka ganacsiga, galmada iyo/ama u isticmaalidda dembiyada
- uu halis ugu jiro in uu noqdo xagjir ama la isticmaalo
- uu leeyahay waalid ama daryeele xabsiga ku jira, ama ay saamayso tacaddika waalidnimo
- ay xaalada qoysku ku keentay caqabad ilmaha, sida balawadaha mukhaadaraadka iyo khamrida, mushkilada caafimaadka dhimirka dadka waawayn iyo tacaddi guriga dhexdiisa ah
- leh laftiisu balwado khamri iyo mukhaadaraad kale
- halis ugu jirtaa waxa loogu yeero 'sharaf' ku salaysan tacaddi sida gudniinka fircooniga ah ama Guurka Khasabka
- uu yahay ilmo si gaar ah qof uu u korsaday.

## Tacaddi, dayac iyo isticmaal

19. Dhammaan shaqaaluhu waa inay ka digtoonaadaan tilmaamayaasha tacaddi, dayaca iyo dhiig-miirashada (hoos eeg), fahamka in carruurtu ay halis ugu jiraan waxyeello gudaha iyo dibadda dugsiga/kulliyadda, gudaha iyo dibadda guriga, iyo onlayn. In la yeesho dharar xirfadle oo la ogaado waxa ay tahay in la eego taas oo muhiim u ah ishaarooyinka hore ee xadgudubka  iyo dayacaada si markaa shaqaaluhu ay u ogaan karaan kiisaska carruurta ee u baahan kaalmo ama ilaalin.

20. Dhammaan shaqaalaha dugsiga iyo kulliyaduhu waa inay ogaadaan in tacaddiga, dayaca, isticmaalka, iyo arrimaha ilaalinta ay yihiin dhacdooyin dhif ah oo aan lagu dabooli karin hal qeexitaan ama hal calaamad oo keliya. Inta badan, arrimo badan ayaa is-dul-saarnaan doona.

21. Dhammaan shaqaalaha, balse gaar ahaan hoggaanka ilaalinta ee loo qoondeeyay (iyo ku xigeennada) waa inay tixgeliyaan haddii carruurtu halis ugu jirto tacaddi ama isticmaalid xaaladaha ka baxsan qoysaskooda. Dhibaatooyinka qoyska ee dheeraadka ah waxay qaataan noocyo kala duwan oo carruurtu waxay u nugulaan karaan waxyeellooyin badan oo ay ku jiraan (balse aan ku xaddidnayn) tacaddiga galmada(oo ay ku jiraan dhibaatayn iyo isticmaalid), tacaddiga qoyska ee xiriirkooda hooseeyo (tacaddiga xiriirka dhalinyarada – taas oo ay ku jiraan xadgudubyada jirka, galmada, xadgudubka shucuurta, iyo dabagalku), isticmaalida, dembiilaha. rabshadaha dhalinyarada, khadadka gobolka iyo xagjiraynta.

22. Dhammaan shaqaalaha waa inay ka  warqabaan in teknoolajiyadda ay qayb muhiim ah ka tahay dhawrista iyo arrimaha fayoqabka. Carruurtu waxay halis ugu jirtaa xadgudubka  iyo halisaha kale ee onlaynka ah iyo sidoo kale fool-ka-fool. Marar badan tacaddiga iyo halista kale waxay u dhacaan u soo noqnoqta onlayn iyo kuwa aan onlaynka ahayn labadaba.

23. Carruurtu iyaga ayaa sidoo kale onlaynka iyagaa tacaddi isku geysta, tani waxay u dhacdaa fariimo tacaddi, hanjabaad iyo dhaqan xumo/nacayb ah, in iyada oo aan la ogolayn qofka lala wadaago sawiro aan wanaagsanayn, gaar ahaan kooxaha wada sheekeysiga, iyo in lala wadaago sawiro iyo muuqaalo qaaqaawan, kuwa aan doonaynin inay helaan waxyaabaha noocaas ah.

24. **Dhammaan kiisaska, haddii ay shaqaaluhu ka shakiyaan, waa inay kala hadlaan hoggaanka ilaalinta loo doortay ama ku xigeenkooda.**

### Astaamaha muujinaya tacaddiga iyo dayacaada

25. **Tacaddi**: waa nooc ka mid  ah si xun ula dhaqanka ilmaha. Qof ayaa tacaddi u gaysan kara ilmo ama dayici kara isagoo u sababaya halis ilmaha kudhacda ama kufashilmaaya tallaabadii uu uga hortagi lahaa halista. Waxyeellada waxaa ka mid  noqon karta si xun ula dhaqan jir ahaan iyo sidoo kale saamaynta araga si xun ula dhaqanka dadka kale. Tani waxay si gaar ah u khusayn kartaa, tusaale ahaan, marka la eego saamaynta ay ku leedahay carruurta nooc kasta oo

tacaddi guriga ah, oo ay ku jirto halka ay ku arkaan, maqlaan ama la kulmaan saamaynteeda. Carruurta waxaa tacaddi loogu gaysan karaa gudaha qoyska ama xarun waxbarasho ama xarun bulsho waxaana ku tacaddin kara dadka ilmuhu yaqaanaan ama, marar dhif ah, dad kale. Xadgudubka ayaa ka dhici kara gabi ahaanba khadka oonlaynka, mise farsamada casriga ah ayaa loo adeegsan karaa fududaynta xadgudub aan oonlayn ahayn. Carruurta waxaa ku xadgudbi kara qof qaangaar ah ama dad qaangaar ah ama ilmo kale ama caruur kale. axaa ku xadgudbi kara qof qaangaar ah ama dad qaangaar ah ama ilmo kale ama caruur kale.

26. **Xad gudub jir ahaaneed**: waa nooc ka mid ah xad gudubka kaasoo ay ku jiri karaan nabar kudhufasho, hantaaturayn, tuuris, sumayn, gubid ama wax kulul uridis, biyo kuquusin, naqas kudhajin ama haddii kale dhibaato loo gaysto jirka ilmaha. Dhibaataynta jirka ayaa sidoo kale imaan karta marka waalid ama qof daryeele ah uu buunbuuniyo, ama si kas ah ugu rido, xanun ilmaha.

27. **Xad gudub dareenka ahaaneed**: niyad ka dilka ilmaha ee joogtada ah sida in lagu abuuro saamayno daran oo xun kobaca dareen ee ilmaha. Waxaa ku jiri kara in ilmaha loogu celceliyo inuu yahay mid nacas ah ama aan cidna jeclayn, aan wax kutoornayn, ama kaliya ay qiimo uleeyihiin sabab laxariirta inay baahida qofkale buuxshaan. Waxaa ka mid ahaan kara inaan ilmaha lasiin fursado uu ku sheego waxa uu dareemaayo, in si gardarro ah loogu xiro hadalka ama 'lagu shactiraysto' waxa uu sheego ama sida uu u hadlo. Waxaa ku jiri kara in himilooyin aan ku haboonayn da'da ama heerka kobaca ee ilmaha kuwaas oo lagu qasbo carruurta. Kuwaan waxaa ka mid noqon kara isdhexgal uusan ilmuhu gaarin marka laga fiirsho awoodiisa kobac iyo sidoo kale difaac xaddhaaf ah iyo in laxakameeyo waxyaabaha ay daawan karaan iyo waxbarashadooda, ama in ilmaha laga hor istaago kaqaybgalka isdhexgalada caadiga ah ee bulshada. Waxay ku lug yeelan kartaa in la arko ama la maqlo si xun ula dhaqanka qof kale. Waxay noqon kartaa cagajugleyn daran (oo ay ka mid tahay hanjabaada internet-ka) taasoo keenaysa in carruurtu si joogto ah udareemaan cabsi ama inay halis kujiraan, ama in lasasabto ama musuq carruur. Qaar ka mid ah heerka tacaddiga shucaareed ayaa laxariira dhammaan noocyada si xun ula dhaqanka carruurta, inkastoo ay kaligeed dhici karto.

28. **Tacaddi galmo**: waxay ku lug leedahay ku khasbida ama ku qalqaalinta ilmo ama qof dhallin yaro ah inay ka qaybqaataan ficillo galmo, oo aanay ku jirin gacan qaad, haddii ilmuhu ka warqabo waxa dhacaya iyo in kale. Ficilladan waxaa ku jiri kara taabasho jireed, oo ay ka mid tahay weerar la xiriira in ilmaha loo galmoodo (tusaale kufsi ama galmada afka) ama falalka aan ahayn galmada sida siigaysiga, dhunkashada, istiiminta iyo taabasha jir salaaxa ah dhar la'aan. Waxaa sidoo kale ka mid noqon kara ficillada aan taabashada lahayn, sida in ilmaha laga qaybgaliyo fiirsashada, ama soosaarista, sawirro galmo ah, daawashada muuqaalada galmada, ku dhiirrigalinta carruurta inay u dhaqmaan qaab galmo ahaan khaldan, ama u diyaarinta ilmaha si aad tacaddi ugu samayso. Tacaddiga galamada ayaa ka dhici kara khadka onlaynka, farsamada casriga ah ayaana loo adeegsan karaa fududaynta tacaddi aan onlayn ahayn. Tacaddiga galmada

maaha mid ay kaliya sameeyaan rag qaangaarka ah. Haweenka ayaa sidoo kale gali kara tacaddi galmo, si lamid ah sida ay ugu samayn karaan carruurta kale. Tacaddiga galmada carruurta ku samayso carruurta kale waa arrin ilaalinta gaar ah oo xagga waxbarashada ah dhammaan shaqaaluhuna waa inay ka warqabaan dugsigooda ama kulliyaddooda siyaasadda iyo hababka wax looga qabanayo. Waxaa jira dembiyo gaar ah oo loogu talagalay carruurta ka yar 13 jir, kuwaas oo aan waligood bixin karin ogolaansho sax ah oo ku saabsan ficilka galmada, waxaana jira dembiyo gaar ah oo caddaynaya in ficilka galmada ee lala sameeyo ilmo ka yar 16 sano uu yahay dembi, iyadoo aan loo eegin inay waxaas ogolaadeen iyo in kale.

29. **Dayaca**: waa ku fashilmida joogtada ah ee ku aadan buuxinta baahiyaha aasaasiga ah ee jireed iyo/ama maskaxeed ee carruurta, taasoo ay ubadan tahay inay abuurto naafo ba'an oo gaarta caafimaadka ama kobaca ilmaha. Dayaca ayaa dhici kara intay hooyadu uurka leedahay, tusaale, sabab laxariirta in hooyadu cabbi jirtay waxyaabaha maandooriyaha ah. Marka ilmuhu dhasho, dayacaaddu waxay ku lug yeelan kartaa waalidka mise daryeelaha oo ku guul daraystay: bixinta cunto, dhar iyo hoy ku filan (oo ka mid tahay ka saarida guriga mise ka tagis); ka ilaali ilmaha waxyeellada jireed iyo dareenka mise halista; xaqiiji kormeer ku filan (oo ay ka mid tahay isticmaalka daryeelayaasha aan ku filnayn); mise hubi helitaanka daryeel caafimaad mise daaweyn habboon. Waxaa sidoo kale ka mid noqon kara dayacaadda, ama inaan qofku dabooli karin, baahiyaha aasaasiga ah ee shucuurta ilmaha.

## Arrimaha ilaalinta carruurta

30. **Dhammaan** shaqaaluhu waa inay ka warqabaan arrimaha ilaalinta ee inta badan is-dhaafsada oo carruurta gelin kara khatar waxyeello. Dhaqamada isku xiran (oo ay ku jiraan laakiin aan kuixaddidnayn arrimaha sida kuwa hoos ku taxan). Waxay dhaqamada iyo tilmaamaha soo socda noqon karaan calaamado muujinaya inaanay carruurtu halis ku jirin:

- isticmaalka daroogada iyo/ama si xun u isticmaalka khamriga,,
- maqnaanshaha aan la qeexi karin iyo/ama joogtada ah ee waxbarashada,
- rabshado halis ah, ka faa'iidaysiga dambiyada (oo ay ku jiraan kuwa la xiriira xuduudaha degmada), xagjirnimada, iyo, iyo
- samaynta ama wadaagista sawirrada qaawan iyo kuwa nus qaaqaawan ama sawirrada badh-qaawan iyo/ama fiidiyowyada ayaa noqon kara calaamado muujinaya in carruurtu ay halis ku jiraan. Waxa hoo ku qaala qaar ka mid ah arrimaha ilaalinta ee ay tahay in dhammaan shaqaaluhu ka warqabaan qaawanaanta.

**Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arrimahan ilaalinta iyo macluumaad ku saabsan arrimo kale oo la xiriira ilaalinta waxaa lagu soo daray lifaaqa.**

## Tacaddiga ilmaha kula kaco ilma kaleoo ay ku jiraan dhibaataynta iyo gacan ka hadal

31. **Dhammaan** shaqaalaha waa in ay la socdaan inay carruurta tacadi kula kacda carruurta kale (taasoo badanaa loo yaqaan xadgudubka  ilmaha kula kaco ilma kale), oo ay ka dhici karto gudaha iyo bannaanka dugsiga ama kulyadda iyo onlaynka. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay caddeeyaan nidaamka iyo dugsiga ama kulliyadda ee la xiriira tacaddiga carruurta iyo doorka muhiimka ah ee ay ku leeyihiin ka hortagga iyo ka falcelinta halka ay rumaysan yihiin in ilmuhu khatar uga iman karto.

32. **Dhammaan** shaqaaluhu inay aqoonsadaan in cunsuriyadda, xadgudubka ku salaysan diinta, iyo noocyada kale ee dhaqamada takoorka ah ay saameyn weyn ku yeelan karaan wanaagga ilmaha, fayoqabka iyo dareenka ammaanka waana in lagu tixgeliyaa dhaqanka ilaalinta halka ay ku habboon tahay.

33. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay fahmaan in xitaa haddii aan warbixinno oollin dugsiyadooda ama kulliyadahooda aysan macnaheedu ahayn inaysan dhacayn. Waxaa laga yaabaa inay dhacdo inaan tacaddi la **soo** sheegin. Sidan oo kale waxaa muhiim ah in marka shaqaaluhu ay qabaan wax walaac ah oo ku saabsan tacaddiga ubadka ka dhashay waa inay la hadlaan hogaankooda ilaalinaya (ama ku xigeenka). Sida tan qaybta ka ah, waa inay dugsiyadu sidoo kale isku dayaan inuu ka feejignaadaan markay carruurtu halis ku jiri karaan maalinta dugsiga (tusaale ahaan, isla markiiba dugsiga ka dib).

34. Waa lagama maarmaan in **dhammaan** shaqaaluhu fahmaan muhiimadda ay leedahay in laga hortago dhaqamada aan habboonayn ee u dhexeeya carruurta habdhaqanka tacaddiga ah. Tusaalooyinka kuwaas ayaa hoos ku taxan. Iska indha tirista habdhaqannada qaar, tusaale iska indha tirista dhibaataynta galmo laga soo qaado "keliya kaftan", "keliya shactiro", "qayb ka mid  ah korriinka" mise "wiil markasta waa wiil" ay abuurayso caadi kadhigista habdhaqanno aan la aqbali karin, goob aan badqab u lahayn carruurta mararka ugu xunna dhaqan caadi ka dhigaaya xadgudubka taasoo keenaysa in carruurtu u qaataan wax caadi ah aysana ku dhiiran inay soo sheegaan.

35. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay ogaadaan inay arinta Tacaddiga ilmaha kula kaco ilama kale at tahay arin ilaalinta dhibanaha iyo danbiilaha la sheegtay labadaba khuseeya

36. Sidoo kale ogaanshaha sida looga jawaab celiyo walaacyada, waa inay **dhammaan** shaqaaluhu ogaadaan in xadgudubka ilme kula kaco ilmo kale laga hortagi karo. Iyo sidoo kale ogaanshaha sida loo aqoonsado dabeecadaha iyo tilmaamayaasha halista xilliga hore, shaqaaluhu waa in ay ogaadaan in waqtiga, caddaynta-wakhtiga ku haboon.

37. Tacaddiga ilmaha kula kaco ilama kale waxay u badantahay in ay ka mid noqdaan, balse kuma koobna:

- gardaraysiga (ay ka mid  tahay gardaraysiga internet-ka dhaxdeeda, wax cuqdad ku saleysan iyo gardaraysiga takoorka)
- dhaqamada takoorka ah, oo ay ku jiraan midab-takoorka, xadgudubka caqiido lala beegsado, iyo dhacdooyin kale oo cuqdada ku salaysan
- xadgudubka  xiriirka jacayl ee shakhsiyadeed ee u dhexeeya carruurta (mararka qaar loo yaqaan 'xadgudubka  xiriirka dhawr iyo toban jirada')
- tacaddiga jirka sida wax ku kudhufasho, laadid, gilgilid, garaac, timo jiidid, ama waxyeelo kale oo jir (waxaa ka mid  noqon kara shayo onlayn ah oo fududayn kara, waxyeeli kara iyo/ama horseedi kara tacadi jir)
- gacan ka hadal halis ah iyo waxyeelada, ama hanjabaad waxyeelo hub wadata,
- Rabshadaha galmada[7] sida kufsiga, weerar galmo oo qofka biyo kagama yimaadaan iyo weerarka galmada; (taas oo laga yaabo inay ku jirto qayb onlayn ah oo fududaysa, hanjabaysa iyo/ama dhiirrigelisa rabshadaha galmada)
- xadgudub galmo[8] sida faallooyin galmo, hadallo, kaftan iyo dulmi galmo onlaynka ah, kuwaas oo noqon kara kuwo gooni u taagan ama qayb ka ah qaab ballaaran oo xadgudub ah
- la sababaayo inuu qof sameeyo ficillo galmo isagoo aan raalli ka aheyn, sida in qof lagu khasbo inuu dharka iska saaro, u taabasho qaab galmo qof, ama in uu cid kale la sameeyo galmo
- Sameynta iyo cid la wadaagista sawiradda qaaqaawan ama qayb-qaawan[9],
- sawir qaadista[10] oo ah badanaa sawir qaadista dharka hoostiisa qof iyadoo aan ogolaansho laga haysan qofka, iyadoo ujeeddadu tahay in la arko xubnaha taranka ama dhabarka si loo gaaro raaxo galmo, ama loo sababo dhibbanaha ceeb, welwel, ama cabsi, iyo
- Abuurista/bilaabida nooc rabshad ama saansaanteeda rituals  (tan waxaa ka mid  noqon kara falalka la xariira dhibaataynta, tacaddika ama bahdilaada loo adeegsado qaab qofka loogu soo daro koox waxaana sidoo kale ku jiri kara waxyaabaha oonlaynka ah).

---

[7] Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan rabshadaha galmada, eeg Qaybta 5 Shanaad.
[8] Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan dulmiga galmada, eeg Qaybta 5 Shanaad.
[9] Tusmada UKCIS: Wadaagista sawirada qaawan mise qayb ahaan qaawan marka la joogo xarumaha waxbarashada
[10] Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan ‘sawir qaadista’ eeg lifaaqa A.

## U isticmaalida carruurta dambiyo (CCE) iyo isticmaalida carruurta (CSE)

38. Labadaba CCE iyo CSE waa noocyo tacaddi ah oo ka dhaca marka qof ama koox ay isticmaalaan dheelitir la'aanta awoodda si ay u khasbaan, u koontoroolaan ama u khiyaameeyaan ilmaha si uu uga qayb qaato fal dambiyeed ama galmo. Waxay ku lug yeelan kartaa beddelka shay dhibbanuhu u baahan yahay ama doonayo, iyo/ama faa'iido dhaqaale ama heerka korodhka ah ee dembiilaha ama fududeeyaha iyo/ama iyada oo loo marayo rabshad ama hanjabaad rabshado. CCE iyo CSE ayaa saamayn kara carruurta, lab iyo dhaddig ba waxaana ku jiri kara carruurta la soo dhoofiyay (oo caadiyan loogu yeero dad dhoofin) si looga faa'iidayso. Iyadoo la raacayo tilmaamahan, waa in la diyaariyo gudbinta ilaalinta carruurta iyo addoonsiga casriga ah ee ku haboon halkaas oo la aqoonsado cid dhibbane CCE ama CSE ah ahaan karta.

## Uga faa'iidaysiga dambiyada ee carruurta - CCE)[11]

39. Qaar ka mid  ah qaababka gaarka ah ee CCE waxaa ku jiri kara carruurta in lgu qasbo ama lagu khaldo qaadista daroogooyink ama lacagta ayadoo la adeegsanaayo laymanka degmada[12], in laga shaqaalaysiiyo warshadaha daroogada, dukaan qaadista ama jeeb siibka. Waxaa sidoo kale lagu qasbi karaa ama lagu qaadi karaa in ay galaan fal danbiyeedka gaariyaasha ama ku hanjabida/samaynta rabshad xun oo ka dhan ah dadka kale.

40. Carruurta ayaa ku dhax xannibmi karta noocyadan ka faa'idaysiga, maadaama oo dambiiluhu uu ugu hanjabi karo dhibanaha (iyo qoysaskooda) in ay waxyeeli doonaan ama in ay ku xanibaan oo ay ku qasbaan deyn lagu leeyahay. Waxaa lagu qasbi karaa inay qaadaan hub sida mindiyo ma in ay bilaabaan qaadashada mindi si ay u siiso dareen difaac ay ka helaan wayeelo ka soo gaarta dadka kale. Iyadoo carruurta qaybta ka ah u isticmaalida fal dambiyeedyada ay badanaa galaan danbiyo, nugulkooda ka dhibanayaal ahaan maaha wax markasta ay ka aqoonsadaan dadka waawayn iyo xirfadlayaashu, (gaar ahaana carruurta roon-roon), islamarkaana aan loola dhaqmin in ay yihiin dhibanayaal inkastoo ay waxyeelo ku dhacayso. Wali waxaa looga faa'iidaysan karaa fal dambiyeedyada xataa haddii falku u muuqdo wax ilmuhu aqbaleyn ama ay rabaan.

41. Waa muhiim in la ogaado in khibrada ay maraan gabdhaha falalka dambiga loo adeegsaday ay aad uga duwanaan karto wiilasha. Tilmaamahaas ayaa kala duwanaan kara, hase yeeshee xirfadlayaashu waa in ay ogaadaan in gabdhaha loo adeegsan karo falalka dambiga sidoo kale. Sidoo kale waa muhiim in ay ogaadaan in labadaba wiilasha iyo gabdhaha loo adeegsaday fal dambiyeedka ay

[11] Eeg macluumaadka ku saabsan qeexidda CCE bogga 48 ee Home Office's Serious Violence Strategy (Istaraatiijiyadda Rabshadaha Xooggan ee Xafiiska Gudaha)

[12] Khadadka degmada waa erey loo isticmaalo in lagu qeexo kooxaha burcadda ah iyo shabakadaha dambiyada abaabulan ee ku lugta leh dhoofinta maandooriyaha sharci darrada ah iyagoo adeegsanaya khadadka telefoonada gacanta ee gaarka ah ama nooc kale oo ah "khadka heshiiska". Linkiyada Khadadka ee Xafiiska Arrimaha Gudaha ayaa lagu bixiyay macluumaadka rabshadaha daran ee ku yaal bogga 171.

halis dheeraad ah ugu jiraan in looga faa'iidaysto falalka galmada.

### U isticmaalida carruurta galmo (CSE)

42. CSE waa qaab ka mid ah tacaddiga galmada ilmaha. Xadgudubka galmada waxa uu ku lug yeelan karaa taabasho jireed, oo ay ku jirto galmo xubnaha taranka istaabtaan (tusaale ahaan, kufsi ama galmo afka ah, ama walax la galinaayo) ama falal xubnaha taranka aysan istaaban sida gacanta biyo iskaga keeneista, dhunkasho, xoqid, iyo taabasho dharka dibaddiisa ah. Waxaa sidoo kale kujira falalka aan taabashada lahayn, sida in ilmaha laga qaybgaliyo isamaynta sawirada galmada, ku khasbida ilmaha inay fiirshaan sawirada galmada ama ay daawadaan muuqaallada galmada, kudhiirri galinta carruurta in ay udhaqmaan qaab galmo ahaan khaldan, ama udiyaarinta ilmaha si ay tacaddi ugu sameeyaan ayna ku jirto kan dhanka intarnet-ka.

43. CSE waxa uu dhici karaa mudo ama hal mar oo waxa uu dhici karaa iyada oo aanu ilmuhu ogeyn tusaale ahaan in muuqaal ama sawiro lagula wadaago baraha bulshada.

44. CSE waxay saamayn kartaa ilmo kasta oo lagu qasbay in ay sameeyaan hawlo galmo. Waxaa ka mid ah 16- iyo 17- sano jir waxa uu si sharci ah u ogolaan karaan galmada. Waxa tani geysan kara qof ama shabakad abaabulan[13] inta badan xadgudubka galmada waxaa geysta kuwa uu dhibanahu hore u yaqaano. Carruurta qaar ayaan ogayn in la isticmaalayo waxaana laga yaabaa inay aaminsan yihiin inay ku jiraan xiriir jacayl oo dhab ah. Sida CCE oo kale, ayaan dhibanayaasha had iyo jeer la aqoonsado waxaana loo tixgelin karaa dambi haddii ay qaadaan tallaabooyin iyadooo la qasbay. Waxay tani weli tahay walaac weyn, maadaama xirfadlayaashu ay sii wadaan inay la kulmaan kiisas carruurta lagu xadgudbo, xadgudub loo diyaariyo, oo laga faa'iidaysto iyaga oon si buuxda u fahmin xadgudubka ay la kulmi doonaan.

## Tacaddiga guryaha

45. Tacaddiga guriga waxa uu keeni karaa habdhaqano kala duwan oo waxa uu noqon karaa dhacdo kaliya ama dhacdooyin joogto ah. Tacaddigu waxa uu noqon karaa, balse aan ku xadidnayn, maskax ahaan, jir, galmo, dhaqaale ama shucuur. Carruurta ayaa u noqon kara dhibane tacaddiga guriga. Waxay arki, maqli ama dareemi karaan saamaynta tacaddiga guriga oo/ama waxay la kulmi karaan tacaddiga guryaha ee xiriirka jacayl (tacaddiga xiriirka dhawr iyo toban jirrada). Dhammaan kuwaas oo ku yeelan kara saamayn mudo dheer ah

[13] Baaritaanka Madaxa-bannaan ee ku saabsan Xadgudubka Galmada Carruurta: Waxa shabakad abaabulan lagu gartaa laba qof ama in ka badan (ha la aqoonsado ama yaan la aqoosan) kuwaas oo is yaqaana (ama lala xiriirsiiyo) oo la og yahay inay ku lug leeyihiin ama sahlayaan ka faa'iidaysiga galmada ee carruurta. Ku lug lahaanshaha ka faa'iidaysiga galmada ee carruurta waxaa ka mid ah in la baro shakhsiyaadka kale si loogu isticmaalo si xun, ka ganacsiga la dhoofiyo ilmaha si loogu isticmaalo si xun, lacag ka qaadashada bixinta hawlaha galmada ee ilmaha ama u oggolaanshaha hantidooda in loo isticmaalo hawlaha galmada ee ilme.

caafimaadkooda, badqabkooda, korniinkooda, iyo awoodooda waxbarasho.

## Gudniinka fircooniga (FGM)

46. **Dhamaan** shaqaaluhu waa in ay la hadlaan hoggaamiyaha ilaalinta loo qoondeeyay (ama ku xigeenkiisa) marka uu yimaaddo wax walaac ah oo ku saabsan gudniinka fircooniga ah ee gabdhaha (FGM). Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira **waajibaad sharci oo gaar ah oo lagu saaray macallimiinta**.[14] Haddii macallin, inta uu ku guda jiro shaqadiisa, uu ogaado in fal gudniinka fircooniga ah lagu sameeyay gabar ka yar 18 sano, macallinku **waa inuu** arrintan ku soo sheego booliiska Eeg bogga 176 wixii macluumaad dheeraad ah.

## Caafimaadka Dhimirka

47. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay ka warqabaan in dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka ay, mararka qaar, isku beddelaan walaacyo ilaalinta. Waxa tani ka mid noqon kara is-waxyeeleyn, is-dilka ama khatar is-dilka. Waxay kaloo noqon karaan tilmaan muujinaysa in ilmo uu la ildaran yahay ama halis ugu jiro inuu la ildarnaado tacaddi, dayacaad ama ka faa'iidaysi lagu sameeyay.

48. **Kaliya** shaqaalaha sida saxda ah loo tababaray ayey tahay in ay isku dayaan baarida cilad dhanka caafimaadka dhimirka ah. Hase yeeshee, shaqaalaha waxbarashada, waxay fursad fiican u haystaan inay la socdaan carruurta maalin kasta ayna aqoonsadaan ilmaha dabeecadiisu muujinayso inuu waajahaayo cilad dhanka caafimaadka dhimirka ah ama halis ugu jiro inuu cilad waajaho. Haddii ilmuhu la itaal daran yahay caafimaadkiisa dhimirka, is-waxyeelleeyn, uu qabo cillad cunto ama uu la leeyahay fikrad isdilka oo uu qorsheynayo inuu noloshiisa soo afjaro, waxaa dhici karta inay jiraan calaamado digniin ah oo shaqaalaha waxbarashadu ay joogaan meel si fiican ugu gartaan. Haddii ilmuhu la itaal daran yahay caafimaadkiisa dhimirka, is-waxyeelleeyn, uu qabo cillad cunto ama uu la leeyahay fikrad isdilka oo uu qorsheynayo inuu noloshiisa soo afjaro, waxaa dhici karta inay jiraan calaamado digniin ah oo shaqaalaha waxbarashadu ay joogaan meel si fiican ugu gartaan.

Waxa kuwaas ku jira:

- isbeddelladda waaweyn ee ku yimaada hab-dhaqanka,
- hurdo la'aan joogto ah,
- ka noqoshada xaaladaha bulshada,
- aysan rabin inay sameeyaan waxyaabaha ay badanaa jecel yihiin, iyo
- calaamadaha jireed ee is-waxyeelaynta ama dayaca naftooda.

[14] Marka loo eego farqadda 5B(11) (a) ee Xeerka Gudniinka Fircooniga ah ee 2003, "macallin" waxaa loola jeedaa, iyadoo lala xiriirinayo England, qof ku jira farqadda 141A(1) ee sharciga waxbarashada 2002 dugsiyada iyo machadyada kale ee England).

49. Ma aha in ilmo kasta oo muujiya dhaqamadan mid isdilaya ama qaba walaac caafimaad dhimirka. Hase yeeshee, marka kuwaas la aqoonsado oo digniinaha kale, ayaa shaqaalaha waxbarashadu aqoonsan karaan carruurta laga yaabo inay la itaaldaran yihiin caafimaadkooda dhimirka oo ka fikiraaya inay is dilaan oo ayna siin karaan taageero iyo faragelin hore oo muhiim ah. Waa inay dugsiyada iyo kulliyadahu hubiyaan in wax ka qabad kasta oo ay bixiyaan ay yihiin kuwo ammaan ah oo wax ku ool ah oo ku habboon baahida iyo marxaladda waxbarashada.

50. Haddii shaqaalaha ay qabaan walaac caafimaadka dhimirka ah oo ku saabsan ilmaha kaas oo sidoo kale ah walaac ilaalin, waa in tallaabo degdeg ah laga qaadaa si loo raaco siyaasadda ilaalinta carruurta ee dugsigooda ama kulliyadda iyo iyadoo lala hadlayo hoggaamiyaha ilaalinta loo qoondeeyey ama ku xigeen. Haddii ay shaqaaluhu dareemaan inuu ilmuhu khatar ku sugan yahay, waa inay 999 wacaan ama ay u diyaariyaan in waalid/daryeele ama qof kale oo ku habboon uu isla markaaba A&E geeyo. Haddii ilmuhu caawimo degdeg ah u baahan yahay si uu u helo caafimaadkiisa dhimirka, laakiin aanay ahayn xaalad degdeg ah, shaqaaluhu waxay caawimo ka heli karaan NHS 111 online ama waxay wici karaan 111 oo ay dooran karaan ikhtiyaarka caafimaadka dhimirka.

## Rabshado halis ah

51. Rabshadaha halista ah waa walaac ilaalin ah oo taagan. Waxa ay ku lug yeelan kartaa weerar jir ahaaneed, qaadashada, hanjabaadda, ama isticmaalka hubka, badanaa marka la eego iskahorimaadka asxaabta ama cagajuglaynta, waxaana sidoo kale ay lala xiriirin karaa ka faa'iidaysiga dambiyada. Waa inuu shaqaaluhu soo sheegaan wixii walaac ah ee ku saabsan ilmo sita ama isticmaalaya hub (ama muujinta rabitaan inuu sidaas sameeyo) hoggaamiyaha ilaalinta ee loo qoondeeyay (ama ku xigeenka). Waa inuu hoggaanka ilaalinta ee loo qoondeeyay qiimeeyaa khatarta ku soo fool leh ardayga iyo kuwa kale ee dugsiga jooga, isagoo tixgelinaya macluumaad ballaaran ama walaacyo, oo uu isla markaana tallaabo ku habboon qaadaa. Iyadoo khatarta ku xiran, waa inay dejiyaan qorshe badbaado iyo taageero ah, iyo meesha ay khuseyso, ay tixgeliyaan tallaabo lagu yareynayo khilaafka asxaabta.

52. Waxa uu dugsiyadu door muhiim ah ka ciyaaraan ilaalinta carruurta rabshadaha, ilaalinta dhibanayaasha, iyo sidoo kale kuwa laga yaabo inay halis ugu jiraan, ama rabshadaha ku lugta leh (kuwaas oo iyaga laftoodu dhibanayaal noqon kara). Waa in shaqaaluhu ay ka digtoonaadaan calaamadaha muujinaya in ilmuhu uu halis ugu jiro ama uu ku lug yeelan karo rabshado halis ah. Waxa ay khatarahani aad ugu sareysaa carruurta waxbarashada carqalad ka gasho (tusaale ahaan ganaaxyada, xayiraada joogtada ah, waqtiga lagu bixiyo meelo kale oo wax lagu bixiyo) ama taariikh dambiyeed. Waa inuu sidoo kale dugsigu isku dayo inuu ka feejignaado markay carruurtu halis ku jiraan maalinta dugsiga (tusaale ahaan, isla markiiba dugsiga ka dib). Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tilmaamayaasha, arrimaha khatarta ah, iyo tallaabooyinka ilaalinta ee la xiriira rabshadaha daran waxaa lagu bixiyay Lifaaqa A.

53. Taageero hore oo ku salaysan caddayn loogu talagalay kuwa loo arko inay halis ku

jiraan, iyo sidoo kale meelaha muhiimka ah marka walaac soo baxo, ayaa muhiim ah. Waxa tani ka mid ah helitaanka dadka waaweyn ee lagu kalsoon yahay, taageerada xirfadaha bulshada iyo shucuurta, iyo, meesha laga heli karo, faragelinta bartilmaameed leh sida la-talinta ama taageerada daaweynta (hagitaan wax ku ool ah oo taageerada la caddeeyay ku saabsan waxaa laga heli karaa Youth Endowment Fund (YEF) ("what works" ee rabshadaha ka hortaga).

54. Waxay hogaamiyayaasha ilaalinta ee loo qoondeeyay ka heli karaan hagitaan dheeraad ah oo ku saabsan gudbinta iyo goorta ay tahay in booliiska xiriiro ee ku jira Lifaaqa B (Maareynta Gudbinta).

## Taageero iyo macluumaad dheeraad ah

55. Talo waaxeed What to do if you're worried a child is being abused: advice (Waxa la sameeyo haddii aad ka welwelsan tahay in ilmo lagu xad-gudbo: la-talinta)for practitioners (dhakhaatiirta) waxay ku siinaysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fahamka iyo aqoonsiga xadgudubka iyo dayaca. Tusaaleyaasha tilmaamayaasha suurtagalka ah ee tacaddika iyo dayacaadda ayaa lagu muujiyey taladaas oo dhan waxayna si gaar ah u caawin doontaa shaqaalaha dugsiga iyo kulyadda. Websaydka NSPCC wuxuu kaloo bixisaa macluumaad dheeraad ah oo faa'iido leh oo ku saabsan xadgudubka iyo dayaca iyo waxa la eego.

56. **Lifaaqa A waxa ku jira macluumaad muhiim ah oo dheeraad ah oo ku saabsan noocyada xadgudubka, ka faa'iidaysiga, iyo arrimaha ilaalinta. Hogaamiyaasha dugsiga iyo kuliyadaha iyo shaqaalaha sida tooska ah ugu shaqeeya carruurtu waa inay akhriyaan liiska.**

## Waxa ay shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda ay tahay in ay sameeyaan haddii ay walaacyo ka qabaan ilmo

57. Shaqaalaha la shaqaynaya carruurta waxa lagula talinayaa in ay ilaashadaan habdhaqanka '**halkan ayay ka dhici kartay**' halka ay ilaalintu khusayso. Marka ay ka walaacsan yihiin daryeelka ilmaha, shaqaaluhu waa in ay had iyo jeer u dhaqmaan sida danta **ugu wanaagsan** ugu jirta ilmaha.

58. Haddii shaqaaluhu ay **wax walaac ah** ka qabaan daryeelka ilmaha, waa inay **islamarkaaba** wax uga qabtaan iyaga. Ka fiiri bogga 27 shaxda isku aadka ah taasoo sheegaysa hanaanka ay racayaan shaqaaluhu marka ay walaac ka qabaan ilmo.

59. Haddii shaqaaluhu ay qabaan walaac, waa inay raacaan siyaasada ilaalinta ururada oo waa inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisa).

60. Fursadaha waxa ka mid noqon kara:

- maaraynta taageero kasta oo ilmaha gudaha ah iyada oo loo marayo nidaamka taageerada xoola-dhaqatada ee dugsiga ama kulliyadda, taas oo

ay ku jirto iyadoo tirada lagu darsanaayo in haddii sidaas la samayeeyo aanay galineynin ilmaha khatar dheeri ah, haddii hogaanka ilaalinta ee loo qoondeeyey (ama ku xigeenkiisa) ay tahay inay wargeliyaan waalidiinta ama daryeelayaasha si ay u sii taageeraan wanaagga ilmaha.sameynta

- Sameynta Qiimeyn Gargaar ee Qoyska.[15] ama
- Sameynaaya u gudbinta adeegyada sharciyeysan.[16] tusaale ahaan maadaama ilmaha laga yaabo inuu u baahan yahay, uu u baahan yahay ama uu la ildaran yahay, ama u badan yahay inuu la ildaran doono waxyeello.

61. Hoggaanka ilaalinta loo qoondeeyay (ama ku xigeenkiisa) waa inay mar kasta diyaar u noqdaan ka hadalka wixii walaacyo ah ilaalin. Haddii ay jiraan xaalado gaarka ah, hoggaanka ilaalinta loo qoondeeyay (ama ku xigeenkiisu) aanay joogin, waa inayna ku iman dib u dhac talaabada munaasabka ah ee la qaadayo. Shaqaalaha waa in ay la hadlaan xubin ka mid  ah kooxda maamulka sare iyo/ama ay talo waydiiyaan daryeelka bulshada carruurta maamulka deegaanka. Xaaladahan oo kale, wixii talaabo ah ee la qaaday waa in lala wadaagaa hogaanka ilaalinta loo magacaabay (ama ku xigeenkiisa) sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah.

62. Shaqaalaha waa in ay kafakarin in xubin shaqalaaha ka mid  ah ama xirfadle kale uu qaado talaabo uuna lawadaago macluumaad muhiim u ah badbaadinta nolosha carruurta. Waa in ay niyada ku hayaan in wadaagista xogta xili hore ay muhiim u tahay aqoonsiga, qiimaynta, iyo qoondaynta waxtarka leh ee bixinta adeegga ku haboon, hadday tani tahay marka koobaad ee ciladu soo muuqato, ama marka ilmo horay u yaqaaneen maamulka maxaliga ah ee daryeelka bulshada ee carruurta (sida ilmo u baahan ama ilmo leh qorshaha difaaca). La wadaagista macluumaadka: talooyin loogu talagalay xirfadlayaasha bixiya adeegyada ilaalinta carruurta, dhallinyarada, waalidiinta iyo daryeelayaasha kuwaas oo taageera shaqaalaha looga baahan yahay inay go’aan ka gaaraan la wadaagista macluumaadka.

63. **UK iyo GDPR kama hortagaan wadaagista xogta sababo la xariira dhawrista badqabka carruurta iyo hormarinta fayaqabkooda.** Haddii ay jiraan wax shaki ah oo ka jira macluumaadka, shaqaalaha waa inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenka). Cabsida ku saabsan wadaagista macluumaadka waa inaan loo oggolaan inay hor istaagto baahida loo

[15] Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qiimaynta caawinta hore, bixinta adeegyada caawinta hore iyo helitaanka adeegyada ayaa ku jira Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta ilaalinta Carruurta.)

[16] Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta ilaalinta Carruurta) waxa uu qeexayaa in la-hawlgalayaasha ilaalintu ay daabacaan dukumeenti heer xad ah oo ay ku jiraan shuruudaha, oo ay ku jirto heerka baahida, marka kiis loo gudbinayo daryeelka bulshada ee carruurta ee maamulka deegaanka si loo sameeyo qiimeyn iyo adeegyo sharci ah sida ku cad qaybta 17 iyo 47. Saraakiisha dawlada deegaanka, oo kaashanaaya iskaashatadooda, waa in ay abuuraan ayna soo dhajiyaan maamus maxali ah oo lagu samaynaayo qiimaynta. Maamuuska maxaliga ah waa inuu dajiyaa nidaamyo qeexan oo ku aadan qaabka kiisaska loo maaraynayo marka ilmaha loosoo gudbiyo maamulka deegaanka ee daryeelka arimaha bulshada ee carruurta.

qabo ilaalinta iyo horumarinta daryeelka carruurta.

## Qiimaynta Caawinta Hore ee Bulshada-ku salaysan

64. Haddii Haddii aanay carruurtu u baahnayn taageerada adeegyada carruurta ee sharciga ah, hoggaamiyaha ilaalinta ee loo qoondeeyay (ama ku-xigeenka) ayaa guud ahaan hoggaamin doona xiriirka hay'adaha kale iyo dejinta qiimeyn hay'adaha dhexdooda ah hadba sida ku habboon. Waxa shaqaalaha laga yaabaa in looga baahdo inay taageeraan hay'adaha kale iyo xirfadlayaasha si ay u qabtaan qiimeyntan, xaaladaha qaarka inay u dhaqmaan sidii khabiirka hoggaaminaya. Waxa tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan qiimeyn wax ku ool ah oo ku saabsan baahida loo qabo Caawinta Qoyska laga heli karaa Wada shaqeynta si Carruurta loo Ilaaliyo. Kiis kasta oo noocaas ah waa in si joogto ah dib loogu eegaa oo la tixgeliyaa iyadoo la bixinaayo tixraac daryeelka bulshada ee carruurta ee maamulka deegaanka si loo qiimeeyo adeegyada sharciga ah haddii xaaladda ilmuhu aysan u muuqan inay ka soo roonaanayso ama ay ka sii darayso. Haddii kale, shaqaalaha hogaanka ee xirfada u leh (tusaale ahaan ma aha shaqaale bulsho) kuwaas oo hogaamin kara qiimaynta faragelinta sharciga ah kahor ayaa sii wadi kara inay hoggaamiyaan shaqada qoysaska ilaa iyo qaybta 17.

## Qiimaynada iyo adeegyada sharciga ah ee daryeelka bulshada carruurta

65. **Haddii ilmo la ildaran yahay, ama uu u badan yahay inuu la ildaran doono waxyeello, waa muhiim in si degdeg ah loogu gudbiyo daryeelka bulshada ee carruurta ee maamulka deegaanka iyo haddii ay habboon tahay booliiska,** (eeg goorta booliiska loo waco: hagaha loogu talagalay dugsiyada iyo kuliyadaha (npcc.police.uk)). **Haddii ay degdeg tahay.** Gudbintu waa in ay raacdaa hanaanka gudbinta deegaanka.

66. Qiimeynta daryeelka bulshada ee carruurta ee maamulka deegaanka waa inay tixgeliyaan halka carruurta lagu waxyeelleynayo meel ka baxsan guriga[17], sidaas awgeed waa muhiim in dugsiyada iyo kulliyaduhu bixiyaan macluumaad intii ugu badan ee suuragal ah ee qaybta ka ah habraaca gudbinta. Tani waxay u sahlaysaa qiimayn kasta in ay xisaabta ku darsato dhamaan cadaynta la heli karo waxayna fududaynaysaa qaab naqshadaysan oo loo xaliyo dhibaatadaas. Macluumaad dheeraad ah ayaad ka helaysaa halkaan: Ilaalinta Xaaladaha (Contextual Safeguarding).

67. Qalabka onlaynka ah ee Report child abuse to your local council (U gudbi xadgudubka Ilmaha lagula kaco galaha deegaankaaga) wuxuu toos ku hagiyaa

[17] Eeg Working Together to Safeguard Children (Wada shaqaynta ilaalinta Carruurta) si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan waxyeellada ka baxsan qoyska iyo deegaanada ka baxsan guriga qoyska

faahfaahinta xiriirka ee daryeelka bulshada carruurta ee maamulka deegaanka khuseeya.

## Carruurta baahida qabta

68. Ilmo baahiyo qaba waxa lagu qeexaa Xeerka Carruurta 1989 inuu yahay ilmo aanay u suuragal ahayn inuu gaaro ama ilaashado heer macquul ah oo caafimaad ama horumar ah, ama caafimaadkiisa iyo horumarkiisa ay u badan tahay in si weyn ama dheeraad ah loo curyaamiyo haddii aan la siin adeegyo; ama ilmo naafo ah. Maamulka deegaanka waxaa laga doonayaa inay siiyaan adeegyada carruurta baahida qaba sababo la xariira ilaalinta badqabkooda iyo hormarinta faya dhawrkooda. Carruurta baahida qabta waxaa lagu qiimayn karaa si waafaqsan qeybta 17 ee Xeerka Carruurta 1989. Sida ku xusan Laga wada Shaqaynaayo Si Carruurta loogu loo Ilaaliyo , maamulka degaanka, oo ay weheliyaan la-hawlgalayaasha ilaalinta iyo hay'adaha khuseeya, waa inay soo saaraan, isku raacaan oo daabacaan borotakoolka dhexe ee qiimaynta iyo taageerada. Waa inay tani qeexdaa cidda u dhaqmi doonta sidii xirfadle hormuud ah oo taageeraya carruurta iyo qoysaskooda sida ku xusan qaybta 17 (oo aan ku koobnayn shaqaalaha bulshada).

### Carruurta la ildaran ama ay ubadan tahay inay la ildarnaadaan dhibaato daran:

69. Maamulka deegaanka, iyagoo kaashanaya hay'ado kale haddii ay habboon tahay, waxa ku waajib ah inay sameeyaan baaritaanno sida ku cad qaybta 47 ee Xeerka Carruurta 1989 haddii ay hayaan sabab macquul ah oo looga shakiyo in ilmo la ildaran yahay, ama uu u badan yahay inuu la ildaran doono waxyeello weyn. Xog uruurintaas ayaa u sahlaysa in ay go'aanshaan in ay qaadaan iyo in kale wax talaabo ah si loo ilaaliyo badqabka loona hormariyo fayaqabka ilmaha waana in loo sheegaa marka ay jiraan walaacyo la xariira ilmo sixun loola dhaqmay. Tan waxaa ku jira dhammaan noocyada xadgudubka, dayaca iyo isticmaalida.

## Maxay tahay inay sameeyaan maamulka deegaanka?

70. Isla maalin gudaheed marka laga soo gudbo wargalinta, shaqalaaha arimaha bulshada ee maamulka maxalliga ah waa inuu xaqiijiyaa helitaanka wargalinta oo ay go'aan ka gaaraa tallaabooyinka xiga ee la qaadayo iyo nooca warcelinta loo baahanyahay in labixiyo. Tani waxaa ka mid ah go'aan gaarista in:

- ilmaha u baahan ilaalinta dakhsaha ah iyo talaabo degdega ah u baahan
- wixii adeegyo ah ee uu u baahan yahay ilmaha iyo qoyska iyo nooca adeegyada
- in ilmuhu baahi qabo, ayna tahay in qiimayn lagu sameeyo si waafaqsan faraqa 17 ee Xeerka Carruurta 1989. Working Together to Safeguard

Children (Ka wada shaqaynta ilaalinta Carruurta) waxay bixisaa faahfaahinta hannaanka qiimaynta

- in ay jirto sabab macquul ah oo looga shakiyi karo in ilmuhu la il daran yahay ama ay ubadan tahay inuu ladaalaa dhacaayo dhibaato weyn, iyo in baaritaano ay khasab tahay in lagu sameeyo ilmaha lagu qiimeeyo si waafaqsan farqadda 47 ee Xeerka Carruurta 1989. Working Together to Safeguard (Ka wada shaqaynta ilaalinta) Children (Carruurta) waxay bixisaa faahfaahinta hannaanka qiimaynta, iyo
- in qiimaynada dheeriga ah ee takhasuska leh loo baahanyahay si looga caawiyo maamulka deegaanka go'aaminta nooca talalabada dheeriga ah ee laqaadayo;

71. Wargalinta waa in dabagal lagu sameeyaa haddii macluumaadkaan uu yahay mid billow ah.

72. Haddii shaqaalaha bulshada ay go'aansadaan in ay sameeyaan qiimaynta sharciga, shaqaalaha waa inay sameeyaan wax kasta oo ay ku taageeri karaan qiimaynta (waxaa taageera hogaanka ilaalinta loo magacaabay (mise kuxigeenka) sida loogu baahdo).

73. Haddii, kadib gudbinta, xaalada ilmuhu aysan u muuqan mid ka soo raynaysa, wargalintu waa in ay martaa habraacyada soosocda ee sii balaarinta qadiyada maxaliga ah si loo hubiyo in walaacyada laxaliyo lana, sida ugu muhiimsan, kor looqaado xaalada ilmaha.

## Ilaalinta diiwaannada

74. Dhammaan walaacyada, doodaha iyo go'aannada lagaaro, iyo sababaha go'aanadaas loo cuskado, waa in iyagoo qoran diiwaanka la galshaa. Tani waxay sidoo kale ka caawisaa haddii/goorta laga jawaabaayo wax cabasho ah oo ku saabsan qaabka kiiska uu u mareeyey dugsigu ama kuliyadu. Macluumaadka waa in ay ahaadaan kuwo qarsoodi ah meel ammaan ahna lagu kaydiyaa. Waa dhaqan wanaagsan in walaacyada iyo gudbinta lagu hayo fayl gaar ah oo ilaalinta ilmaha ee ilmo kasta.

Diiwaannadu **waa in** ay ku jiraan:

- dunaanad cad oo dhammaystiran oo ku saabsan walaacyada
- faahfaahinta sida walaacyada loo daba galay ee loo xaliyay, iyo
- qoraal ku saabsan tallaabo kasta oo la qaaday, go'aannada la gaaray iyo natiijada.

75. Haddii laga shakiyo shuruudaha diiwaangalinta, shaqaalaha waa inay kala hadlaan hoggaanka ilaalinta loo qoondeeyay (ama ku xigeenka).

## Maxay dhammaan arrimahan muhiim u yihiin?

76. Waa muhiim in carruurtu hesho caawinta saxda ah xilliga ku habboon si looga hortago halisaha ilaalinta badqabka, loogana difaaco arimaha ugasii dari kara halisaha jira iyo hormarinta faya dhawrka ilmaha. Cilmi-baaris iyo dib-u-eegisyada dhaqanka ilaalinta carruurta ee deegaanka ayaa si soo noqnoqod leh muujiyay halisaha ka dhasha ku fashilmida qaadista tallaabo wax ku ool ah.[18] Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhaqanka ilaalinta carruurta ee deegaanka waxa laga heli karaa Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta ilaalinta Carruurta). Tusaalayaasha tallaabooyinka liita waxaa kujira:

- ku fashilmida tallaabo qaadashada iyo u gudbinta calaamada hore ee tacaddiga iyo daycaada
- diiwaan keydin liidata
- in la dhagaysan waayo aragtida ilmaha
- in dib loo qiimayn waayo walaacyada marka xaaladda aysan ka soo rayn
- in aan lala wadaagin macluumaadka dadka saxda ah iyo hay'adaha dhaxdooda
- in macluumaadka si aad u gaabis u ah loo wadaago, iyo
- in aanad ku cadaadin dadka u muuqda inaysan qaadayn talaabadii loo baahnaa.

## Waxa ay tahay in shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadaha sameeyaan haddii ay qabaan walaac ku saabsan ilaalinta ama ay jirto eedeyn ka dhan ah xubin kale oo shaqaalaha ka mid  ah

77. Dugsiyada iyo koleejyada waa inay lahaadaan habab iyo habraacyo lagu maareeyo walaac kasta oo ilaalinaya ama eedaymo (iyadoon loo eegayn inta yar) ee ku saabsan xubnaha shaqaalaha (ay ku jiraan shaqaalaha saadka, mutadawiciinta, iyo qandaraaslayaasha).

78. Haddii shaqaalaha ay qabaan walaac ilaalinta ah ama eedayn waxyeello ama halis u ah carruurta waxaa laga sameeyaa xubin kale oo ka tirsan shaqaalaha (oo ay ku jiraan shaqaalaha sahayda, mutadawiciinta, iyo qandaraaslayaasha), markaa:

- waa in tan loo gudbiyaa maamulka macallimiinta ama maamulaha kuwaas oo qiimeyn doona haddii gudbin LADO loo sameyn doono.
- meesha ay jiraan walaacyo/eedeymo ku saabsan maamulka baraha ama maamulaha, waa in tan loo gudbiyaa barasaabka, gudoomiyaha gudida maamulka ama dib gaystaha dugsiga madaxa banaan, iyo
- Haddii ay dhacdo walaac/eedeyn ku saabsan maamulaha, oo uu

[18] Qaadaa dhigista dib u eegista kiisaska halista ah waxaa laga heli karaa barta gov.uk/government/publications/serious-case- reviews-analysis-lessons-and-challenges

maamuluhu sidoo kale yahay mulkiilaha kaliga ah ee dugsi madax bannaan, ama xaalad ay jirto khilaaf dan ku jirto oo ku saabsan in arrinta loo sheego maamulaha macallimiinta, taas waa in si toos ah loogu wargeliyaa Maamulka deegaanka ee loo magacaabay sarkaal (-yaasha) LADO(yada). Faahfaahinta LADO-ga deegaankaaga ayaa si fudud looga heli karaa webseedka maamulka deegaankaaga.

79. Haddii shaqaalaha ay qabaan walaac ilaalinta ah ama eedaymo ku saabsan xubin kale oo shaqaale ah (oo ay ku jiraan shaqaalaha sahayda, mutadawiciinta ama qandaraaslayaasha) oo aan buuxin heerka waxyeellada, markaa tan waa in lala wadaagaa si waafaqsan siyaasadda walaaca heerka hoose ee dugsiga ama kulliyadda. Faahfaahin dheeraad waxaa laga helayaa Qaybta afaraad nuqulka dhamaystiran ee KCSIE.

## Waxa ay tahay in shaqaalaha dugsiga ama kuliyadaha sameeyaan haddii ay qabaan walaac ku saabsan xeerarka ilaalinta carruurta ee kajira dugsiga ama kuliyada

80. Dhammaan shaqaalaha iyo mutadawiciinta waa in ay dareemaan in ay awood u leeyihiin in ay kor u qaadaan walwalka ku saabsan dhaqanka liita ama aan badbaadada lahayn iyo guul-darrooyinka ka iman kara ilaalinta dugsiga ama kulyadda oo ay ogaadaan in walaacyadan ay si dhab ah u qaadan doonaan kooxda hoggaanka sare.

81. Habraacyo ku habboon kashifida waa in loo dajiyaa si walaacyadan oo kale loogala hadlo kooxda hoggaanka sare ee dugsiga ama kulyadda.

82. Marka xubin ka mid  ah shaqaalaha uu daremo inuusan awoodin sheegista halis ka imaanaysa qofka ay ushaqeeyaan, ama uu dareemaayo in walaacyadiisa rasmiga ah aan waxba laga qabanayn, marinno kale oo ay wax ku kashifi karaan ayaa u furan:

- talo guud oo ku saabsan shaacinta qarsoodiga (whistleblowing) waxaa laga heli karaa whistleblowing for employees (Qofka soo gudbiya Xogta Shaqaalaha)
- khadka NSPCC Whistleblowing Advice Line (Laynka Tallada Xog soo gudbinta ee NSPCC) ayaa diyaar u ah sidii waddo kale oo loogu talagalay shaqaalaha aan dareemayn inay awoodaan inay gudaha ku soo bandhigaan walaacyada ku saabsan ku fashilmida ilaalinta carruurta, ama qaba walaac ku saabsan sida ay dugsigoodu ama kulliyaddoodu u maareynayaan walaacaas. Shaqaaluhu waxay wici karaan 0800 028 0285 – khadkana waxa uu furan yahay laga bilaabo 08:00 ilaa 20:00 Isniinta ilaa Jimcaha, iyo 09:00 ilaa 18:00 maalmaha fasaxa (Sabtida iyo Axadda). Cinwaanka iimeylka help@nspcc.org.uk[19]

[19] Beddelka taas, shaqaalaha waxay warqad u soo qori karaan: Ururuka Qaran Kahortaga Dhibaatada loogaysto Carruurta (NSPCC), Weston House, 42 Curtain, Road, London EC2A 3NH.

**Jaantuska 1 aad: Jaantus socod (Flowchart): Tallaabooyinka ay qaadaan dugsiga ama kulliyadda marka ay jiraan walaac ku saabsan ilmo.**

**Shaqaalaha iskuulka ama kulliyadda ayaa tallaabo degdeg ah qaadaya.** Waxay raacaan siyaasadda ilaalinta carruurta ee goobtooda waxayna la hadlaan **qofka ilaalinta loo qoondeeyay.** Waxa ay qaybta afraad ee hagitaankan qeexaysaa **tallaabooyinka la qaadayo haddii uu kiis sidoo kale ku lug leeyahay walaac ku saabsan xubin ka mid ah shaqaalaha.**

**Hoggaanka ilaalinta ee loo qoondeeyay** go'aansado haddii gudbin loo baahan yahay daryeelka bulshada ee carruurta. Wuxuu dugsigu ama kulliyadda tixgelinaysaa **taageerada wadaadnimada ama a Qiimaynta iyo la socodka xaaladda maxalliga ah ee Caawinta Qoyska.** Haddii walaacyadu sii kordhaan, dugsiga ama kulliyadda ayaa gudbin sameynaaya.

Dhammaan marxalad kasta, **shaqaaluhu** waa inay **xaaladda ilmaha dib u eegis ku samee** (oo ay ku jiraan qofka loo xilsaaray ilaalinta ama ku xigeenkiisa, sida loogu baahdo) oo **dib u tixraac haddii ay habboon tahay.** Waxay tani hubin doontaa in xaaladda ilmuhu ay soo hagaagto. **Waxa danaha ilmaha ugu wanaagsan waa in had iyo jeer la hormariyaa.**

Hoggaanka ilaalinta ee loo qoondeeyay ayaa go'aaminaaya **in loo baahan yahay gudbin daryeelka bulshada ee carruurta** (oo wacayaa booliiska, haddii ay ku haboon tahay). Waxay raacaan **habka gudbinta** ee ku xusan dhokumentiga xadka ugu hooseeya kiiska iyo borotakoolka qiimaynta. Wada shaqaynta ilaalinta Carruurta ayaa macluumaad dheeraad ah haysa.

**Hal maalin shaqo** gudaheed kadib marka gudbinta dugsiga ama kulliyad laga helo, **daryeelka bulshada ee carruurtu ayaa go'aamin doona nooca jawaabta loo baahan yahay** oonay wargaliyaan taas dugsiyada ama kulliyadda oo la tixraacayo. Waxa ay shaxda Socodka 2 **qeexaysaa tallaabooyinka la qaadayo marka gudbin la sameeyo .**

**Shaqaalaha dugsiga iyo kulliyadda** waa inay sameeyaan wax kasta oo ay awoodaan si ay u taageeraan **daryeelka carruurta ee bulshada.**

## Jaantuska 2 aad: Tallaabooyinka la qaado marka kiis loo gudbiyo qaybta daryeelka bulshada ee carruurta

**Hal maalin shaqo gudaheed** laga bilaabo kadib marka gudbinta dugsiga ama kulliyad laga helo, **daryeelka bulshada ee carruurtu ayaa go'aamin doona nooca jawaabta loo baahan yahay.**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Ilmaha ayaa loo arkaa inuu u baahan yahay **ilaalin degdeg ah. Daryeelka Carruurta ee Bulshada** ayaa wargalinaaya dugsiyada ama kulliyadda loo gudbinaayo. | **Baaritaanada Qaybta 47** ayaa loo arkaa inay ku habboon yihiin. **Daryeelka Carruurta ee Bulshada** ayaa wargalinaaya dugsiyada ama kulliyadda loo gudbinaayo. | **Baaritaanada Qaybta 17** ayaa loo arkaa inay ku habboon yihiin. **Daryeelka Carruurta ee Bulshada** ayaa wargalinaaya dugsiyada ama kulliyadda loo gudbinaayo. | Qiimayn rasmi ah looma baahna. **Daryeelka Carruurta ee Bulshada** ayaa wargalinaaya dugsiyada ama kulliyadda loo gudbinaayo. |
| **Booliska shaqaalaha bulshada ama NSPCC** ayaa qaadaaya **tallaabo degdeg ah oo ku habboon.** Waxa taasi ka mid noqon kara codsiga amarka **ilaalinta degdegga ah (EPO)**. | Ilmaha waxaa loo aqoonsaday inuu yahay ilmo **halis weyn ugu jira waxyeello.** Sida ku cad Xeerka Carruurta ee 1989, maamullada deegaanka ayaa laga rabaa inuu bixiyo adeegyo loogu talagalay carruurta u haaban taas oo ujeedadu tahay ilaalintooda iyo kor u qaadida wanaagooda. Hagaha sharciga ah Wada shaqaynta ilaalinta Carruurta, and | Ilmaha waxaa loo aqoonsaday inuu yahay **ilmo baahan (CiN)** oo la siiyay taageerada ku habboon. Sida ku cad Xeerka Carruurta ee 1989, maamullada deegaanka ayaa laga rabaa inuu bixiyo adeegyo loogu talagalay CiN si loo ilaaliyo loona hormariyo fayoqabka. Wada shaqaynta ilaalinta Carruurta ayaa macluumaad dheeraad ah haysa. | **Dugsiga ama kulliyadda** tixgelinaysaa taageerada shucuurta **taageero iyo Qoyska** Waxay **Caawinta** Qoyska caawisaa inay bixiso taageerto isla marka dhibaato soo baxdo wakhti kasta oo nolosha ilmaha ah ka mid ah. Tixraac Jaantuska Socodka 1. Wada shaqaynta ilaalinta Carruurta ayaa macluumaad dheeraad ah haysa. |